




Gaariga la Kirysto



WARBIXINTA #005

DIB UCUSBOONAYSIINTA SHAATIGA TAARIKADA LA HELI KARO/TAKSIGA

2023 Maayo

Muddada dib ucusboonaysiinta ee Shaatiga Taarikada Taksiga (T.P.L.) iyo Shatiyada Takaasida dadka Naafada ah (A.T.P.L.) ee 2023 waxay u dhexaysaa Juun 1 ilaa Juun 30.

Marka aan galno muddadan mashquulka badan, wakhtiyada sugitaanka ee xafiiska Gawaarida la Kirysto wuxuu ka badan karaa wakhtigii caadiga ah waannaanu kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga iyo fahamkaaga. Wuxuu baaraynaa suurtagalnimada in hanaanka dib ucusboonaysiinta loo wareejiyo qaab onleen ah, laakiinse hadda, dib ucusboonaysiinta waa in lagu dhammaystiraa qaab fool ka fool ah iyadoo la tagayo xafiiska Gawaarida la Kirysto.

Xafiiska Gaariga la kirysto (2340 – 22 Street NE) wuxuu furan yahay saacadaha u dhexeeya 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha si shatiyada dib loogu cusboonaysiyo. Dadka taarikooyinka haysta waxaa la xasuusinaya in ay la yimaadaan Rukhsadda Darawalnimada ee Gobolka Alberta ama Rukhsadda Darawalnimada Taksiga ee aad haysato. Kharashka dib ucusboonaysiinta Shatiga Taarikada Taksigu (T.P.L.) waa \$495.

Livery Transport Bylaw waxaa ku xusan qodobo la xidhiidha muhiimadda ay leedahay dib ucusboonaysiinta T.P.L. ama A.T.P.L.

Faqrada 35

- (1) Haddii T.P.L. ama A.T.P.L. ay taariikhdiisu dhacdo oo aan codsi dib ucusboonaysiin ah lagu soo gudbin **30 maalmood gudahood marka uu dhaco**, intaas kaddib T.P.L. ama A.T.P.L. waxaa loo arkaya mid laga maarmay xaqqa qofku u leeyahay inuu dib ucusboonaysiyyana meesha waa laga saarayaa.

Waxa aanu uhanqal taagaynaa in aan ku aragno Juun. Fadlan wixii su'aalo ah noogu soo dir iimaylka VFHlicensing@calgary.ca

War baahintan waxaa loo turjumay Amxaari, Carabi, Faransiis, Hindi, Bunjaabi, Soomaali iyo Urduu. Riix halkan si aad u aragto dokumentiyada.

Mahadsanid,

Dawn Unsworth

Madaxa, Shati siinta Gawaarida Kirada ah
EMCS, Heerarka Gawaarida Dadweynaha